

# Gaashaan ka dhigashada



Dadka gaashaan laga dhigto  
Taxanaha taxriifka iyo sheegashada



Xukunkiisa. qiyaaskiisa

Magaca Alle ayaan kubillaabayaa ee naxariis guud iyo mid gaarba naxariista  
Mahad waxaa iska leh Alle, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato  
sayidkeena rasuulkii Alle ahaa iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo kuwii raacay.

Wuxuu ka weyn yahay **Alle agtiisa**  
Suulitaanka adduunka

**Waxay** kaga faa'deystaan qaar ka mid ah kooxaha mitidka ah mas'aladaha qaar  
fiqiga oo culimadu isku khilaafeen; ujeeddooyin dumis ku dhisan, taas waxay ku  
bannaystaan xaaraanta waxayna ku jabiyaan xurmada, waxaana ugu xurmad  
weyn uguna daran shareecada islaamka xurmada dilka.

Xurmadan sameynteeda waxay ka weyn tahay Alle agtiisa suulitaanka adduunka  
iyo wixii ku sugan sida xadiiska sharafta leh kusoo aroortay: (suulitaanka addu-  
)unka wuxuu ka fudud yahay Alle agtiisa in loo dilo mu'min si xaqdarro ah  
Iyadoo sidaas ay tahay kuwan mitidka ah waxay khilaafaan asalka diinta iyo  
ujeeddooyinkeeda, oo ah wixii umadda ay isku raaceen, oo imaamyada ay isku  
:waafaqeen in: asal ahaan dhiigga uu xaaraan yahay

Tirmidhi ayaa wariyay(1395) [baabka diyooyinka], Nasaa'i (3987) [kitaabka xarimidda dhiigga],  
ibn Maa'jah (2619) [baabka diyooyinka] iyo kuwa kale, xadiiska Cabdullaahi ibnu Cumar.

Waxaa ka mid ah mas'aladaha ay u daliilsadaan kooxaha mitidka ah falalkooda dhibka keenaya (mas'alada Gaashaan ka dhigashada) oo kusoo aroortay kutubta usuulka iyo fiqiga.

Waana laga faa'idaystay waxaana looga qiyaasqaatay bannaysiga dilka iyo qarxinta, iyo burburka iyo burburinta, iyadoo wax reebaya jirin diin ama damiir ama akhlaaq ama dhaqan.

Waxay ku magacaabaan arrimaha magac aysan lahayn iyagoo sheeganaya jihaad, daliil iyagoon ka haysanin diinta Alle iyo kitaabka iyo sunnada.

Maxaa laga wadaa  
gaashaan ka  
dhigashada



Waa inuu cadowga isku ilaaliyaa waqtiga dagaalka iskuna qariyaa qof xaaraan ay tahay in la dilo

Oo ay ka mid yihiin  
muslimiinta

Iyo kuwa la xukun ah:

Oo ka mid ah ehlu kitaabka ama  
dadka ballanka la la galay ama caruurta.

wuxuu u dhigayaa hortisa sida gaashaanka siduu uga  
Feebo naftiisa weerarka muslimiinta.. waxaa laga wadaa  
Dadka gaashaan laga dhigto





## Xukunka dadka gaashaan laga dhigto

**Mas'alada dilka gaashaanka** (Dadka gaashaan laga dhigto) oo muslimiinta ka mid ah culimada way isku khilaafeen, qaarkooda waxay qabaan inaysan bannaanayn; waxaana daliil u ah oraahda Alle: (haddaynan jirin Rag iyo Haween mu'miniin ah oo ayadan ogaanin inaad dardartaan ayna mashaqo idin haleesho ogaal la'aan (Eebe waa idiin fasixi lahaa)) [Suuratu Alfatxi 25]

◆ Imaamyada caddeeyay waxaa ka mid ah:

Ala-awzaaci iyo Allayth iyo Alqaffaal iyo Albaqawi iyo Annawawi



Wuxuu yiri imam Allayth ibnu Sacad – Alle ha u naxariistee – in layska dhaafo furidda dhufeys la furi karo waxay ka fiican tahay in loo dilo muslin-xaqdarro) [Almuqni, Ibnu Qudaama (9/288)].

Qolo ayaa bannaysay oo imaamyada ka mid ah iyagoo cuskanaya maslaxa almursalada oo ku xiran maqaasidda iyo masaalixda guud ee umadda waxayna u sameeyeen shuruud iyo qaacidooyin waxaa ka mid ah:

1 - Almuqni, Ibnu Qudaama (9/288)

2- Rowdatu Adhilaalibinta, Annawawi (10/246)

3- Rowdatu Adhilaalibinta, Annawawi (10/248)

## Shuruudaha iyo qaacidooyinka gaashaan ka dhigashada

Muslinka cadowga ay gaashaanka ka dhigteen in la dilo waa xaaraan shuruudanhan markii la helo mooyee waxaana ka mid ah:



1

Inay tahay maslaxadda mid guud ah oo kulli ah oo ayna u sugnayn qolo yar.

2

In gaashaan ka dhigashada ay taagan tahay marka gaalada dagaal lagaga hortagayo.

3

Inay maslaxadda dilkiisa ay tahay mid go'an ee aan male ku dhisnayn.

4

Inay daruuro ku qasbaysa muslimiinta dilkiisa.

Haddaan la helin shuruudahan falkiisa waa mamnuuc, laakin hadday tahay maslaxadda mid daruuri ah dhibka ka dhalanayana uu kusoo noqonayo umadda oo dhan ee ah dabargoynta muslimiinta iyo jiritaankooda xaaladdan oo kale lama reebi karo; maxaayecelay waxaa ka imaanaya tagidda gaashaanka iyo islaamka iyo muslimiinta, waxayna ka mid tahay reebidda dhibka guud lagu reebo dhib gaar ah, waxaana isku waafaqsan arrintan dhammaan dadka caqli leh oo ka mid ah muslimiinta iyo dadka kaleba.

## Qiyaas si kaste u qaldan

Malgu qiyaasi karaa qaraxyada iyo dilka dadka waxba galabsan mas'alada gaashaan ka dhigashada?

?

Jawaabtu waa: **maye!**

### Qiyaas hallaysan

Waa qiyaas farqi wata; waxaa kala duwan qaabka qaraxyada iyo gaashaan ka dhigashada gaalada ay ka dhiganayaan muslinka kala duwanaashahaas wuxuu ka dhigaa mid aan dhici karin sharci ahaan in laysku qiyaaso; kuma jiro gaashaan ama gaashaan ka dhigasho ama qafaal gacanta cadowga !!! bal waxaa jirta khiyaano iyo ballanburis oo aan laga hili karin qaabka gaashaan ka dhigashada ama wax la mid ah macane ahaan.

### Waxa lagsoo reebo asalka:

Asal ahaan dhiigga waa xaaraan, dilka gaashaankana wuxuu khilaafsan yahay asalka, waana laysku haystaa, qofkii banneeyay wuxuu ku xiray shuruud, ma ansaxayso in qiyaaska la waasiciyo !!!

### Kala duwanaanshaha makaanka iyo samanka:

Ma ansaxayso in la keensado qaabka gaashaan ka dhigashada laysku haysto ee goobta dagaalka, lagasoo bilaabo samanka dagaallada hore ilaa samankeena hadda, kuma suurtagalayso qaraxyada ka dhacaya dalalka muslimiinta ama dalalka kale in cadowga ay isku qarinyaan qafaal, samankan waxaaba la ilaalinayaan nolosha qafaalka si kuwa kale loogu soo furto iyo la mid ah ee lama dilo.

Iyo qof Qafaal ahayn, sida kan ag degan mushrikiinta ama waardiyeaasha ama dadka waddada maraya, ma qaadanayaan xukunka gaashaan ka dhigashada, xataa qofkii banneeyay taas.



## Qiil aan la oggolayn

Kuwa xagjirka waxay qiil ka dhigtaan taas waxaan u sameynaynaa: dhib aan ku dhibayno gaalada?!

Waana cagsi: falkan maalmahan waxaa ka dhasha:

Wuxuu usoo jiidaa muslimiinta  
burbur iyo baaba'!!!

1

Cadowgana sabab ayuu ka dhiganayaa  
si uu muslimiinta u qabsado oona  
go'doon u galiyo hantidoodana uu u  
qaato masaalixdoodana joojiyo !!!

2

Ma la suuraysan karo inay tahay mooyee  
dhulka in la fasahaadiyo caalamkana  
laysku soo diro muslimiinta iyo  
dacwadooda oona lagu dhejiyo argagixi-  
sanimo naxariisdarro.

3



## Waa

qiil aan la oggolayn oo khilaafsan qaacidooyinka cilmiga marka lasoo  
qaadanayo axkaamta shareecada, waxaa ka mid ah qaacidada weyn  
muhimka ah oo ay culimadu isku raaceen

### Qaacido muhim ah

Haddii ay maslaxadda ka hortimaado mafsaddo reebidda mafsaddada waxaa laga  
hormarsiinayaa soo jiididda maslaxadda.

## Daliil taag daran

Waxay daliilsadaan dadka sugaya mas'aladahan oo fatwoonaya oona dilaya muslimiinta oona qarxinaya oraahda ah: galidda jannada ayaannu usoo dedejinaynaa !!!.

Taasna qof sheegay ma jiro, kitaab iyo sunnana kuma sugna, waa been Alle iyo rasuulkiisa lagu abuuranayo, xaqiiqa ahaan waa diinta iyo shareecada oo lagu ciyaarayo iyo qaacidooyinkeeda sugan, yaa xaqaa u siiyay inay qof muslim ah noloshiisaa dhaafsiyaan? Waxaaba laga yaabaa nolosha inay u tahay khayr badsasho !!!

Mowqif quraanka ku sugan oo dabargoynta shubhada dadka khilaafsan farriimaha Allaha caalamka.

Mowqifka wuxuu dhacay waqtiga heshiiska Xudeybiya quraankana si cad ayuu uga dhigay mid waaraya markuu Alle kaga reebay mu'miniinta inay la dagaallamaan Qureysh oraahdiisa:

{ haddaynan jirin Rag iyo Haween mu'miniin ah oo ayadan ogaanin inaad dardartaan ayna mashaqo idin haleesho ogaan la'aan (Eebe waa idiin fasixi lahaa Si uu u galiyo cidduu doono naxariistiisa (ayuu saas u yeelay), Hadday mu'miniintu ka soocmi lahaayeen gaalada wuxuu Eebe caddibi lahaa gaalada caddibaad daran.) } [Suuratu Alfatx:25]. {Aydan ogaanin,} oo laga wado ma ogaanin inay yihiin mu'miniin { inaad dardartaan,} aad dishaan oo aad hallaysaan, macnaha waa: haddaydan ku istaagi lahayn rag mu'miniin ah iyo haween mu'minaad ah oydan ogeyn Alle wuu idin fasixi lahaa galitaanka Makka, wuuna idinku salidi lahaa, laakin waxaan dhowrnay dadkii ku sugnaa oo iimaan-koodi qarinnay, oraahdiisa: { ayna mashaqo idin haleesho } macarro waa ceeb.. waxaa laga wadaa mushrikiinta oo oranaya: dadkii isku diinta aad ahaydeen ayaa idin laayay<sup>1</sup> Hadday mu'miniintu ka soocmi lahaayeen } ay ka dheeraan lahaayeen, haddii ay mu'miniinta ka baxsanaan lahaayeen gaalada, seef ayaa lagu cadaabi lahaa gaalada... aayaddan waxay daliil u tahay gaalka in lagu ilaaliyo xurmadda muslimka..1

<sup>1</sup> waxaa lagasoo qaatay tafiirka al-Qurtubi (16/286).



**Eeg caddeynta** quraanka iyo manhajka rabbaaniga siduu dagaalka u reebay ilaalin la ilaalinayo darteed mu'miniinta oo iimaankooda qarinaya, falkaasna inuu ceeb usoo jiidayo dadka muslinka, maxaad u melaynasaa qofka dilaya dadka islaamka iyo mu'miniinta oo kas iyo maag ah ???!

**Naxariis ilaahi  
Iyo milicsi xagga dacwada**

**Kadib eeg** naxariistan ilaahiga iyo milicsiga dacwada oo ku sugan oraahdiisa:

{ Si uu u galiyo naxariistiisa cidduu doono } taasoo fureysa albaabka si uu usoo galo islaamka iyo naxariista Alle qofkuu doono oo ka mid ah dadka aan muslinka ahayn, sidaasna ayuu ku ahaa rasuulka dhamaan dhaqamadiiisa xataa gaalada markuu la dhaqmayay; wuu ku dadaali jiray, waa ka cudurdaaran jiray waa u duceyn jiray, sidaas ayaa la rabaa muslinka inuu ugu dadaalo khayrka siduu u gaarsiyo dadka oo dhan.

**Eeg** fikirkan oo wax dumiya oo khilaafsan wixii islaamka la yimid oo ah farriimaha dabacsan, kaasoo dadkiisa ay samaynayaan dil iyo foolxumeynta islaamka iyo in dadka lagaga cararsiyo iyagoo taas ku khilaafaya dhamaan usuusha caqliga iyo naqligaba.

## Gunaanad

Mas'alada gaashaanka (u isticmaalidda dadka sida gaashaan) waa arrin aragti ah. culimada usuul fiqiga ayaa tusaale ugu yeelay si ay u sharxaan macnaha qaacidooyinka qaarkood.

1

Mas'alada gaashaanka waa la isku haystaa. Culimo badan ma oggola. Kuwa yiri waa la oggol yahay shuruudo iyo qaacidooyin ayay u dhigeen. Taas micnaheedu waa xaaladdan, oo uu cadowgu ku gaashaaman yahay kuwa ay reebban tahay in la dilo, waa khasab, oo qofka muslimka ahi doorasho kuma laha.

2

Isbarbar-dhigidda qaraxyada bambooyinka iyo dilka dadka aan waxba galabsan iyo arrinta gaashaanku waa is-barbar-marin dhinac walba ah sababtuna waa iyada oo aan la fulin shuruudihii lagu gaari lahaa gunaanadyo la mid ah, iyo sababta oo ah in la dilo qof loo adeegsaday gaashaan waa wax khilaafsan asalka.

3

Waxa ka dhacay Xudaybiya, oo Quraanku xusay, oo ahaa joojinta dagaalka iyadoo laga baqayo in waxyeello soo gaadho Mu'miniinta. Maka waa caddaynta ugu weyn baadilnimada ee kuwa raacsan beenta, iyo khiyaano-oleyaasha iyo xagjiriinta ay rumaysan yihiin dilka Muslimiinta iyo kuwa aan waxba galabsan.

4

Fikradani kuma xidhna ujeedooyinka Islaamka. Waxba uma soo kordhiso marka laga reebo foolxumeynta muuqaalka saafiga ah ee weyn iyo inay ka tirtiranto dacwada islaamka dhulka, iyada oo carqaladaynaysa mabaadii'da iyo qiyamka Islaamka ee ugu weyn, sida naxariista guud ee bani'aadamka, ku dadaalidda badbaadintooda iyo gelitaankooda diinta Alle.

5